



**Maclumaadka
baska iskuulka**

Ilmahaaga waxa loo ogolaaday gaadiidka iskuulka ee baska, faylkani wuxu xambaarsan yahay macluumaadka adiga waalid masuula ahaan. Ma raadinaysaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan gaadiidka iskuulka, sharciyada fogaanta ama habka go'aan gaarista, wax badan ka sii akhri: www.vaxjo.se/skolskjuts

Qaybaha masuuliyada

Waalidiinta ayaa mas'uul ka ah ardayda ilaa ay ka soo fuulaan baabuurka iskuulka meesha loo cayimay ee laga raaco, iyo ka dib marka ay ka soo degaan goobta loogu talagalay dhamaadka maalin dugsiiyeedka.

Iyadoo loo marayo darawalka baska, qaadaha wuxuu mas'uul ka yahay ardayda marka ay u safrayaan ama ka imaanayaan iskuulka iyo u hoggaansanka sharciyada wadooyinka. Hadi ay dhacdo dhacdo ama xadgudub la xiriira gaadiidka iskuulka, waxay ku dhacaysaa maamulaha si uu arinka u baaro.

Shuruucda badqaka

Dib u eegis lagu sameeyo xeerka nidaamka iyo badbaadada sidoo kale layliga daadgureynta ayaa si joogto ah loogu habeeyaa ardayda baska saaran. Soo fuulista iyo ka degista waa in ay u dhacaan si deggan. Ardayda waa in ay fariistaan inta lagu jiro safarka baska. Suunka badbaadada ayaa la isticmaali doonaa.

Dib u dhaca ama seegista baska iskuulka subaxdi

Hadii baska iskuulka maqan yahay wakhtiga bixitaan ee lagu heshiiyey, waxaad la xiriiri kartaa shirkada ardayda u kaxayso iskuulka.

Phone number

Bergkvarabuss 0470-70 23 06

Busspecialisten 0470-782 782

Flexbuss 0481-548 00

Grimslövsbuss/Mohedabuss 0470-50 10 33

Lammhults taxi 070-9179923

Nilsbuss 0492-56 66 05

Taxikurir 0470-160 00

Växjö taxi 0470-135 00

Guud ahaan, ardayda waxay ku noqonayaan guriga ama meel kale oo ay waalidka cayimeen hadii baska iskuulka soo daaho wax ka badan 30 daqiiqo.

Safarka galabnimo

Ardayda waxay la xiriiri doonaan shaqaalaha dugsiga oo iyagana la xiriiri doono masuulka taraafikada/gaadiidka iskuulka ee degmada. Ardayga waa in uu ku sugnaadaa iskuulka ilaa gaariga beddelka ah yimaado.

Heerarka dhaqanka

Ardayda waa in ay ku sugnaadaan kuraastooda inta safarka lagu jiro oo ay sugaan ilaa baska ka istaago meesha laga baxo.

Ardeyda ugu dambayn ku qasban in ay wadada ka gudbaan ka dib marka ay baska ka soo degaan waa in ay sugaan ilaa uu baabuurku ka dhaqaaqo. Ardaydu waa in ay dhegaystaan oo raacaan tilmaamaha darawalka baska. Darawalka baska ayaa u sheegi doono dhacdooyinka maamulkiisa taraafikada.

Kuwa baaskiilka ku taga meesha loo cayimay ee ka raacitaanka waa in ay dhigtaan baaskiiladooda si aysan u hor istaagin dadka lugeynaya/isticmalaya waddooyinka.

Dacwadaha magdhowga waxa lagu jihayn karaa qofka ama dadka waxyeelada u geysta gaadiidka dugsiga. Dhamaan waxyeelada waxaa la ogaysiin doonaa booliiska.

Kaxaynta

Kaxaynta waxa gacanta ku haya iskuul kasta. La xiriir shaqaalaha iskuulka wixii macluumaad dheeraad ah.

Wazaan si wadajir ah u abuuri karnaa hab amaan ah oo loo tago loogana soo laabto iskuulka! Aad ayay muhiim u tahay adiga ka waalid ahaan in aad kala hadashaan xeerarka nidaamka iyo badbaadada ee ku jira galkan, si dhamaan ardayda baska iskuulka u ogaadaan in ay ku dhaqmaan oo ay raacaan shuruucda.

Su'aalaha ku saabsan gaadiidka iskuulka waxaa ka jawaabayo masuulka gaadiidka iskuulka 0470-410 00, skolskjutsgruppen@vaxjo.se, www.vaxjo.se/skolskjuts.



**Växjö
kommun**